Information barn/ungdom

***Sababta aad warqaddaan waxaan rabnaa inaan ku weydiinno inaad nagala qeybqaadato baaritaan cilmiyeed dheer oo ku saabsan Caafimaad dhimirka iyo ka qeybqaadashada bannaanbixinta (habilitering) caruurta iyo dhallinyarada naafada ah.***

## Aasaaska iyo ujeedada

Caafimaadka dhimirka waxa loola jeedaa ama la mida sida inaad tiraahdo maskaxiyan baan u caafimaad qabaa. Waxay noqon kartaa inaad faraxsan tahay ama aad furfuran tahay. Mid kale oo lagu garto in maskaxiyan loo caafimaad qabo waa marka qofku sameynayo hawlo uu jecel yahay sida akhriska, ciyaarta TV-ga ama in waqti lala qaato saaxiibada. Cilmibaaristaan waxaan rabnaa inaan ku baarno sidey caruurta naafada uga caafimaad qabaan dhimirka iyo haddey jiraan hawlo ay jecel yihiin ineey sameeyaan. Waxaan aaminsannahay in qofka siduu dhimirka caafimaad uga qabo is bedeleyso marka qofku da’oobo. Sidaa la ajligeed ayaan rabnaa inaan baarno shan mar muddo afar sano ah gudahood sideey caruurta iyo dhalinyarada naafada caafimaadkooda dhimirka  uu yahay.

Haddaad rabto waxaad weydiisan kartaa qof kuu akhriya kuna fahansiiya warqadda. Waxaad xitaa daawan kartaa filin warbixin ah oo sharaxaya baaritaanka, guji boggan ama sawir ka noocaana aga qaado (skanna QR-koden) kaamerada mobaylkaada waxaad markaa kuu gudbinayaa filinka warbixinta ah.

https://play.ju.se/media/Informationsfilm+longitudinella/0_vj0yi2gq

**Maxaannu adiga kuu dalbannay?**

Sababta aad warqaddaan u heshay waa inaad horey ama hadda maruun la xiriirta bannaanbixinta (habilitering).

**Sideey baaristu u dheceysaa?**

Waxaan rabnaa inaan kula kulannos han goor muddo afar sano ah gudahood. Waxaan rabnaa markaa inaan ku weydiinno caafimaadkaada maskaxda siduu yahay, tusaale haddaad inta badan caloolxun tahay. Waxaan kaloon rabnaa inaan ku weydiinno hawlaha kala duwan ee aad sameyso iyo kuwee atyaad ugu jeceshahay. Su’aalaheenna waan fududeyndoonnaa sidaan kuu weydiineyno iyo sidaad uga jawaabi kartid. Haddaad aalad isticmaashid aaladdaadaan wax kugu weydiin doonnaa. Waxaan kugula kulmi karnaa iskuulka, habiliterinka ama gurigaada, adaa go’aankeeda leh goobta kulanka. Kulankeennu wuxuu qaadanayaa qiyaas 1 saac.
Waxaan xitaa eegi doonnaa warbixintaada ku jirta HabQ ee taalla goobta bannaanbixinta (habilitering). Waa tan tijaabada caqliga ah iyo su’aalo ku saabsan sidaad u maareeysid/dabbartid nolol maalmeedkaada.

Waxaan rajeyneynaa inaan su'aalahaan ku ogaan doonno sida caruurta iyo dhalinyarada naafada ah caafimaadkooda dhimir yahay. Marka caruurta ka sheekeeynayaan caafimaadkooda dhimirka waxaa laga yaabaa ineey dareemaan waxaan habbooneyn. Haddii intii aan ku jirno ama ka dibba aad heysato su'aalo aad rabto in lagaaga jawaabo waxaad noagala soo xiriiri kartaa habiliterinkaada ama waalidkaa weydiisan kartaa kaalmo ineey la xiriiraan habiliterinka. Waxaad xitaa la xiriiri kartaa Susann Arnell oo ah xiriiriyaha gobolka ee baaritaankan (fiiri macluumaadka hoos ku xusan).

**Si xor ah**

Waa xor in laga qeybqaato baaritaankan waadna ka shalayn kartaa markaad ogolaatay ka dib ama go'aansan kartaa inaad sii wadato ama ka baxdo ka hor intuusan billaaban, intuu socdo ama marka koox wareysiga ka dib, adoon sharaxaad ka bixin sababta. Xitaa waad iska deyn kartaa inaad su'aalaha ka jawabtid adoon u baahneyn inaad sheegto sababta. Goortaad rabtaad u sheegi kartaa waalidkaada, ama baarayaasha inaadan rabin inaad ka qeybqaadato. Haddaad doorato inaad iska joojiso ka qeybqaadashadaada saameyn kuma yeelanayso kaalmada lagaa siiyo habiliterinka. Waalidkaa xitaa waa ineey ogolaadaan oo ay haa dhahaan haa wuu ka qeybqaadan karaa baaritaanka.

**Waxaan ku sameyneyno jawaabahaada**

Halkaanaad ka akhrisan kartaa waxaan ku sameyneyno su'aalahaada. Su'aalahaada waa la keydin doonaa waxaana helikara oo keliya baarayaasha cilmiyeed. Su'aalahoo dhan waxay heli doonaan kood intii magacaada ama nambarradaada kale lagu qori lahaa.

Siyaan ula sooxiriirno adiga iyo waalidkaa markale kulankeenna sanadka hore ka dib waxaa jira liis oo ay koodadkoo dhan ku yaalaan oo kuu sheegaya nambarka lagu siiyey. Kan loogu yeero koodka furayaasha waxaa la dhigayaa meel kale oo ka duwan halka jawaabahaada lagu keydinayaa si dadka kale ay u ogaan yaa sidaan u jawaabay. Jawaabahaadoo dhan iyo caruurta kale kuwooda waxaa lagu keydin meel xiran och dabku kareyn 10 sano ka dibna waa la baabi'inayaa Jawaabuhu waxay oolayaan Jaamacadda Jönköoping (Högskolan i Jönköping).

Xaq baad u leedahay inaad jawaabahaada akhrisato. Waad sixi kartaa waxaad u aragto qalad. Waxaad xitaa go'aan ka gaari kartaa in jawaabaha qaar la tuuro. Waxaad weydiisan kartaa in macluumaadka sida meeshaad deggan tahy, in la tirtiro. Haddaad rabtoinaad jawaabahaada akhrisato waxaad adiga ama waalidka la hadli kartaan Mats Granlund oo ah masuulka baaritaant cilmiyeedka e-mayl: mats.granlund@ju.se, taleefan: 036-101221. Qofka masuulka ka ah xifdinta jawaabahaada, waa Oskar Westergren, e-mayl: dso@ju.se, taleefan: 036-101779. Haddaadan ku qanacsaneyn sida macluumaadkaads iyo jawaabahaada loo maamulay waxaad xaq u leedahay inaad u dacwooto hey'adda xifdinta macluumaadka shaqsiga (Datainspektionen).

Jawaabta baaritaanka waxaa lagu daabici doonaa joornaalada cilmiyeedka iyo kulammo kala duwan. Markaan soo bandhigeyno wixii ka soo baxay baaritaan cilmiyeedka laguma garan doono iunaad ka qeybqaadatay, ma qori doonno qofna ma magacaabi doonno mana tilmaami doonno tilmaan laguugu raadin karo.

**In baaritaanka laga qeybqaato**

Haddaad rabto inaad ka qeybqaadato baaritaanka, hoos ka saxiix foomkan ku lifaaqan (ogolaansho) weydiisana in waalidka jawaabta ku soo diraan bashqadds la socota warqadda. Haddaad su'aalo qabtid qor ama nasoo wac annaga oo ah masuuliyiinta baarista.

Macasalaama

Mats Granlund
Hälsohögskolan
Box 1026, 551 11 Jönköping
Tel: 036-101221
E-post: Mats.Granlund@ju.se

Xiriiriye Örebro:
Susann Arnell
Universitetssjukvårdens
forskningscentrum (UFC),
Universitetssjukhuset Örebro
701 85 Örebro
Tel: 019-602 5893 eller 0587-84 219